Waraysi: Xuseen Cabdi Xalane (Xalane)

May 14, 2017

Odhaahda Tifaftirka: *Waxaa noo suurta gashay in aan warasyi taabanaya dhinacyo badan oo Suugaanta ah in aanu la yeelano Mudane Xuseen Cabdi Xalane, oo ah Abwaan gabayaa ah, si aad ah-na loogu qadariyo Suugaanta Soomaalida. Abwaan Xalane waxa uu in badan ka soo shaqeeyay ha'addaha samafalka. Waxa kale oo uu Xalane horey u noqday Wasiirka Maaliyadda ee Soomaaliya wakhtigii KMG ee sanadkii 2010 iyo ka gadaal DFS ee sanadkii 2014. ,Waraysiga waxa u qaaday WardheerNews Cabdikariim C/raxmaan X. Xasan.*

WardheerNews (WDN): **Md. Xuseen Cabdi Xalane: marka hore ku soo dhawow WardheerNews, marka xiga inta aanaanu u gelin waraysiga, maadaama aad in badan ku soo dhex jirtay howlaha samafalka, gurmadka iyo taakulenta danyarta, kana soo shaqaysay ha'addo caalami, mas'uulna ka soo noqotay, maxaad nooga sheegi kartaa abaarta ka jirta guud ahaan Bariga Afrika iyo gaar ahaan Soomaaliya iyo sidii looga hor tegi lahaa mustaqalka?**



Xuseen Cabdi Xalane (Xalane): Marka hore Cabdikariim waxaan halkan salaan qiimo badan uga gudbinayaa bahda tifaftirka wardheerNews, sida wacan ee aad iskugu taxalujisaan haqabtirka dhinaca Suugaanta, fikradaha iyo wararka guud ahaan Geeska Afrika, gaar ahaan Soomaaliya.

Haddii aan u soo noqdo su'aasha Abaarta, runtii Abaaro badan oo magacyo la baxay baa soo maray Soomaalida, laakiin middan hadda ka taagan ama ku habsatay guud ahaan Bariga Afrika, Yemen iyo Nayjeeriya iyo gaar ahaan Soomaaliya, waxay ku soo aaddey xilli xun oo dalku kala qaybsan yahay oo ayan jirin hal dawlad ah oo gacanta ku wada haysa dalka. Tani waxay keentay in uu adkaado isku socodka gaadiidka iyo dadka, laakiin isgaarsiin xagga sancadaha oo cusub baa jirta oo durba wararka la isugu tabiyo, oo goobtii aad u liidata la ogaan karo si loo taakuleeyo ama gargaar loola gaadho. Xooluhu si aad ah bay u leedeen, dad baddanna waxay u

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

dhinteen sababo Abaarta la xidhiidha. U diyaargarowga Abaarta ee Samafalka caalamiga ahna wuu liitay.

Hase yeeshee dadka Soomaalidu way isku gurmadeen inta tabartood ah gudo iyo dibadba, taasna ilaa xad waxbay badbaadisey.

WDN: **Waxaad tahay gabayaa lagu qadariyo dhinaca suugaanta iyo taariikhda gabayada, bal si kooban noogu guud mar taariikhdaada dhinaca suugaanta, gabayadii ugu horeeyay ee aad tirisay iyo duruufaha aad ka tirisay, tix-na nooga sheeg gabayadaasi?**

Xalane: Ba'yadi aan ku soo korey Gabaygu wuxuu ahaa xirfad miisaan leh aadna loo qiimeeyo. Anoo aad u yar baan gabayga bilaabay, hase yeeshee Aabahay Cabdi Xalane (Alle naxariistii jano haka waraabiyee) ma jecleysan isagoo iiga baqay il dad iyo inuu dakano ii keeno. Si kastaba ha ahaatee Misanaha Dhaantada inta badan gabdhaha lagu raajiciyo ayaan bilaabay anoo aad u yar. Gabayadii aan yaraanti tiriyey lume, oo anigu ma hayo laakiin gobolada Bakool, Shabeelle iyo Afdheer haddii laga raadiyo waa la heli karaa. Waxaan xusuustaa dhawr bayd ka xusuustaa gabay aan tiriyey doorashadi 1968 oo adeerkey Cilmooge Jacuur u tartamayey, waxaana ka tirshay Qudhac-joome oo ka trisan Degmada Ceelberde ee Gobolka Bakool. Waaxana ka mid ahaa:

Dalkoo idil durbaankiyo waxaa laysku dabayaaci
Waa darajo doon uumiyuhu deyr la joogaba e
Aniguna dadaalkiyo waxaan xoogga ugu duubtey
Doorashada Cilmoogaan rabaa maanta dibitaade

Si kastaba ha ahaatee markaan ka imid deegaanki reerkayaga, ayaan dib u billaabay gabayadi oo qaar badan hadda la daabacay.

Waxaa dhawaan la daabacay Buug la yiraahdo ***Cibaaro*** oo ay ku ururs an yihiin gabayadayda badidood iyo kuwii riddoo-celinta ahaa ee la soo tiriyey.

Gabayadu waxay taabanayaan baal kasta, waxaanse halkan tusaale ahaan idiinku soo minguuriyey labo gabay (*Diiwaanka Maansada Xuseen Cabdi Xalane)* oo midna sida Calanka Buluugga ah u ciillan yahay ka hadlaya, mid kalana sida talada dalka Soomaalida gacanteeda ugu jirin. Khataraha ku soo waajahan Soomaalida iyo sida ay Soomaalidu u hurrudo ayuu si hurgumo leh u tibaaxayaa.

Gabayga 1aad: Han La'aan; (Nairobi, May 2016).

Gabaygan wuxuu ka mid yahay gabayo dhawr ah oo ciil iga keenay ka dib markaan arkay sida taladi dalku gacanta Soomaalida ugu jirin iyo sida Soomaalidu mid walba midka kale boqnaha u jarayo. Taasoo keentay inay madiidin u noqdaan qorsho quwado shisheeye wataan oo biya-dhaciisu yahay in marag ma doonto laga dhigo sida Soomaalidu u tashan *karin*, oo u gogol xaadhaysa in loo taliyo. Taasoo keeni karta in la kala googooyo oo dib gumeysi loogu celiyo.

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

Xil. Abdi Xoosh oo ah Sharci-yaqaan, kana tirsanaa Baarlamaanka heer Qaran wakhtiga aan tiriyay Gabaygan, ayaa soo saarey qoraal uu ku canbaareeyey wareegtadii Madaxweynaha Soomaalidu ku jideeyey habka doorashada 2016-ku u dhacayso ee ku slaysan hanaanka awood qaybsiga qabiilka ee 4.5, isagoo sheegay inuu sharcigi ka leexday Madaxweynuhu.

Gabaygan isagaan ku halqabsaday anigoo isagana xusuusiyo in sharciga uu sheegayo maanta beri hore la laalay, dalkana lagu wado amar Wakiilka Qaramada Midoobey iyo Safiir Nairobi jooga ka yimid. Gabaygu wuxuu soo bandhigayaa khatarta Soomaali ku soo fool leh iyo caqli-xumada ka muuqata Soomaalida:

Diiwaanka Maansada Xuseen Cabdi Xalane

- *Xooshow higgaadiyo anoon gabay, u taag haynin*
- *Anoo hibashadii dhigay anoo, hoorin kari waayey*
- *Heedadawga Soomaalidaa, hamatugleynaysa*
- *Ee haadki gaadhigu ka lumay een, jidnaba haysan*
- *Halkay aakhirkow hoyan anoo, heli aqoon waayey*
- *Hoos u foorar mooyeen anoon, aayo kale haynin*
- *Hugunkaaga goortaan maqlaan, soo hankaabsadaye*

- *Hadal aad qoraal iyo af iyo, heer walba u sheegtay*
- *Hadal cadhiyo hiif badan watood, dhuunta ka hinraagi*
- *Hoggaanshaha dalkooniyo ninkaad, u huwiseen Taajka*
- *Sharciguu hareer maray Dacawadda, aad ku hurineyso*
- *Ma haddaad hanbaaburi waxaad, haybin la illowye*

- *Madaxweyne maankiisu hago, waa horuu hadhaye*
- *In Quwado na haystoo jiraan, loo habrado maanta*
- *Ma halmaansan tahay waaqacaa, caawa ku horyaalla*

- *Lixdankii xornimadii la helay, haybaddii calanka*
- *Qarankaan hantiney dawladdaan, xoog ku soo hoyinay*
- *Hayb-hayb qabiil kuma imaan , horimo reereede*
- *Hibana looma dhiibine rag baw, hurey naftoodiiye*
- *Halgan ay Soomaalidu dhammaan, wadar u hawshootey*
- *Hoggaan loo dhan yahay bay ku timid,hoodo dirireede*

- *Halyeygii Daraawiishta iyo, weerarkuu huriyey*
- *Raggii faraska heensaha sidii, haadda fananaayey*

Waraysi: Xuseen Cabdi Xalane (Xalane)
Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

- *Iyagoo haliil qaba raggii Gaal, hurdo u diidey*
- *Halbowlihii la jaray Koofil iyo, Janannadii hoobtay*
- *Hugunkiyo hubkiyo raacdadiyo, hootadiyo seefta*
- *Ingiriis haddaan lagu habsiin, holaca baaruudda*
- *Haye kuguma siiyeen dhulkuu, haystey waligiise*

- *Haddaan hadafki Leegiyo la marin, hilinki loo jeexay*
- *Oon Talyaani hagardaamaduu, waday la heeteynin*
- *Oo aan hujuum joogta iyo gaadmo, lagu haynin*
- *Hadhacuu dhistiyo beerahii, kama huleeleene*

- *Guushii haween iyo rag iyo wadar, ku hawshoodey*
- *Hiirtaanyo guushii xabsiga, geesiyow hoyisey*
- *Guushii Halyey daacadiyo, hebello loo laayey*
- *Waa taa hog dheer lagu ridoon, lagu hadaaqeyne*
- *Nabad lagu halmaaliyo heshiis, waara la hilmaanye*
- *Habar-wacasho iyo waa qabiil, faanka la hayaaye*

- *Sida Goroyadii hoogtey ee niniba, baal hiigtey*
- *Waxa cadaw na haaligi waxaa, hagar noo qoolan*
- *Waxa halis hareertaad daydaba, nagu dul heehaabi*
- *Iyo sidaan hannaadkaa u nahay, lagu dul haasaawi*
- *Dalkan lagu hardamayee Nin lihi, hoy ka odhanaynin*
- *Hawadayda beenta ah markaan, kali la haasaawo*
- *Ciil baan habeenadan hurdada, hadiba waayaaye*

- *Hayaankiyo haddii aan hiddiyo, hubiyey taariikhda*
- *Sidan uma habaarreyn dadkaan, hayb ku raac nahaye*
- *Hiirtaanyadini waa ugub, dhibaan hore u beereyne*
- *Gacalkii is hanaq goynayiyo, hagar dad loolaayey*
- *Muslinkii halaagmiyo dhulkani, dhiig wax lagu hoorshay*
- *Harjadkiyo agoontii hadhiyo, maata hamayaaqda*
- *Gablankii Haweenkiyo wixii, hooyo badan ooyday*
- *Habaarkoodi baa shaw caqligu, nooga haajiraye*

- *Taariikhaha wixii hore u dhacay, waad ku hirataaye*
- *Hanashada habkii maamulkiyo, haabashada meel fog*
- *Halgankiyo hanweynida wixii, horumar aan taabnay*
- *Moos haqab la'aaniyo hadhuudh, hilib la iibgeeyo*
- *Gaajadii hadhiyo cuduradii, aan u qalab hayney*
- *Halbowlaha dhaqaaliyo wixii, guulo lagu heesey*
- *Aqoontii hagaagtiyo afkii, hooyo qoristiisa*

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

- *Ciidankaan hub iyo xoog dhisniyo, dirir u heegnaati*
- *Hanjabaad yar hadalkaan dhehnoo,cadawgu hayn waayo*
- *Wax kastoon haweynaba dhaqsihi, loo hirgalinaayey*
- *Sumcaddaan hantiney uunka oo, wadarba noo heellan*
- *Iyo hoogga dhacay maanta saan, cidiba noo haybsan*
- *Is-hareera dhiga waa adduun, hadimadiisiiye*

- *Afrikadu inay nagu hirtaan, hillinka aan qaadnay*
- *Dalalkii gumeysiga ku hadhay, hiilo gacansiinta*
- *Qaaraddaan hormuudka u ahayn, haga masiirkooda*
- *Huubadeedi maantiyo inaan, nahay hadhaageeda*
- *Hagoogteeda Ceebtaa dhammaan, waan humbulanaaye*

- *Hal ka daran habawgaan nahiyo, hoog kalaa jira e*
- *Dalka hooyo oo hadal la'aan, nalaga hoos saaro*
- *Hagardaamadeedaan arkaa, haraggu saarreyne*
- *Bal inuu dadkeennaa hurdaa, qaar hinqada yeesho*
- *Hurgumada ka dhalan duullankaa, inagu heedaaman*
- *Aan hawadiyo gabay hiil ahoo, hoga tusaaleeya*

- *In kastoo markaan heeryadii, diidnay la hayaanshay*
- *Isticmaarku hiihdii ma dayn, hibashadoodiiye*
- *Kama hadhine damacoodi hore, hakasho mooyeene*
- *Iyagooba sii horumaroo haysta, dunidoo dhan*
- *Oo shaati kale soo huwdey, na halwinaayaane*

- *UNkaa hantiyo deeqahaan, heli lahayn qaatey*
- *Habka Feedaraalka ay wadaan, waa hog nagu tuure*
- *Iyadoo Dastuurkaan hufnee, hore inoo yaallo*
- *Waxa qaar hankaagoo cusubi, loo hirgelin yaabki*
- *Inaan nahay dadaan hore u jirin, oo haddeer dhalada*
- *Ma habaaran nahay seen middaa, looba hadal haynin*

- *Dadkeennoo hurgamadii qaboon, laga heeshiin eeddi*
- *Hab ismaamul hadaf Reer Galbeed, u hindisoo jeexay*
- *Hummaag gobollo lagu sheegayo, hoosta wada reera*
- *Oo laga hortagi maalintey laba, heshiin maagto*
- *Hawo been ah hagardaamadaa, faraqa lays haysto*
- *Horin horinba loo goo dalkaad, ku hamineysaane*
- *Hindisaha shisheeyuhu wateen, u hanqal taageynno*
- *Waa haddimadeeniyo sidii, haadda kala yaace*

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

- *NGOyadaa waxay hayaan, aan war laga haynin*
- *Hawl samafal lagu sheegagiyo, balo ka hooseysa*
- *Harjadnimada Soomaalidiyo, caydha hamayaaqda*
- *Maatada harraad ba'an qabtiyo, hooyo macaluusha*
- *Lacagaha dartood lagu heleey, soo hureen dunidu*
- *Waxyar baa dadkaannee u hoyan, heedadowga ehe*

- *Hoteelada Nairbiyo guryaha, wada hillaacaaya*
- *Waxa gaal hadhsanayaa sidii, haad raqdu u taallo*
- *Kumannaan haween iyo raggaa, haatan tamashleeya*
- *Hantidey ku tuman Reer galbeed, kama hadlaayaane*
- *Wax kastoo hallaabana aday, kugu hafraayaane*
- *Haddaan hadaf ka weyn jirin haddaan,dani u hooseynin*

- *Waxay soo hoyaadsheen waxay, ku hantiyeen maalki*
- *Xisaab lama huraan iyo marbay, hubin lahaayeene*

- *Markii aan awood iyo hub iyo, ciidamada hayney*
- *Dariiskaan hujuumniyo raggaan, hore u eedowney*
- *Iyagoon dakanadoodi hadhin, lagu halaakeeyey*
- *Inaan hoos fadhino maanta oon, hiil ka filanayno*
- *Hordhaceedu waa Qoon haftoo, haanka loo jaraye*
- *Waxa nagu habsaday ee Caqliga, haaro naga saarey*
- *Waxaan la hundhudhnaa wayla yaab,hiil Allaa jira e*

- *Ragga talada maantadan hayee, hileyga loo saarey*
- *Hawl-fulin, hoggaan baarlamaanka,heer kastaba dawlad*
- *Higsigooda kuma meel maraan, haybaddii qarane*
- *Himmaddii dadkoodiyo maslaxad, horumar gaadhsiisa*
- *Hammigooda laga waa inay, shacab u hiilshaane*
- *Hanjabaadda Gaaliyo farriin, haatufku u keenay*
- *Waa hadal safiir yidhi waxay, daba hubleeyaane*
- *Maandhow hankoodii waxaa, hoos u dhigey maanta*
- *Waxay la habradaan yaa yaqaan, waygaa hogane*

- *Waxse ay higgaadeedu noqon, Ani hilaadeyda*
- *Dalkoo hodan ah khayrkaa ku hilan,Bad iyo Hawdkiisa*
- *Dad halligan dad heehaabayoon, geeri huri doonin*
- *Dad iyagu is-hanaq goynayoo, heeri boqontooda*
- *Inaan lagu hallayn Karin nacfiga, kor iyo hoos buuxa*
- *Inayn hanan karayn dawladnimo, qiil u heliddeeda*
- *Waa hadafka gaalada waxay, u halgamayaane*
- *Inaguna hormuud baan u nahay, taa hirgalinteede*

Waraysi: Xuseen Cabdi Xalane (Xalane)
Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

- *Dad habow ah duul habacsanoon, hadaf lahayn muuqda*
- *Bal inaan hadoof nahay caqliga, jeer fog ka hallaabay*
- *Dadaan khayrba noo haynin oo, hadimo noo qooli*
- *Waxaad ugu hogaansami waxaad, sacabbadow hoorsan*
- *Car bal yaa halbeegeeda garan, hoogga dhacay maanta*

- *Gun uunbaa hannaankaa aqbali, heeryo qaadka ahe*
- *Dad hayeeye raacoo u nugul, heer kastba ceebta*
- *Dal dhanoo Halyey dhiidhiyoo, hiifta laga waayey*
- *Mar horuu shisheeyuhu hubsaday, huubadaad nahaye*
- *Inaguna Maxmiyad hoogtay baan, ku hardamaynaaye*
- *Halgan kale raggii hurin lahaa, wali ma haysaane*
- *Howhowda iga daa cidlaad, ka hanjabaysaaye*

Gabayga 9aad: Calanka (Mogadishu 2014):

Gabaygan waxaan tiriyey horraanti 2014 anigoo ka murugoodey dhibta loo soo maray helidda Calankan Buluugga ah iyo sida maanta uu u ciillan yahay. Ninkii si fiican u yaqaan Af Soomaaliga uma baahna in loo sharxo oo isagaa dhuuxan kara nuxurka ujeedada gabayga:

- *Calankaa buluuggow inaad, ciillan tahay maanta*
- *Ood cadho la guban waan arkaa, caawa saad tahaye*
- *Anbase ceebta waan kula qabaa, caam dalkoo idile*
- *Calool xumada aan wada qabniyo, caatadiyo weyda*
- *Intaad kali calaacali lahayd, kula catowgeyga*
- *Taariikhdaada caanka ah haddaan,soo cuskado caawa*
- *Waxba yeyn cilladahaa bedelin, caabuqaa badane*
- *Carcar gobinamay galin kartaa, ciidan daallaniye*
- *Aan caraabsho waatoy ciftaan, cidahan liitaaye*

- *Ciyaar kuma imaan oo xornimo, cidi ma dhiibteene*
- *Cudud iyo caqlaa lagugu helay, dirir colaadeede*
- *In Caddaan cabiidsado dalkoo, na cabudhshaan gaalo*
- *Oyn caqiidadeeniyo bedelin, caadadiyo diinta*
- *In cadaadiskaa laga gudbiyo, cidhibta raadkeedi*
- *Weerkey cirrooliyo xidheen, culumadii diinta*
- *Dumarkii caraabiyo ruclaha, jiifka uga cagey*
- *Dhallintii ciddowdey ee soo, cag dhigi waayey*

Waraysi: Xuseen Cabdi Xalane (Xalane)
Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

- *Cartankiyo dagaalkii intaan, cadawga riixeynay*
- *Qaar bay rasaastii cuntoo, ciidda hoos galaye*
- *Ciqaab iyo cabsida taaganta ah, cagajuleyn boolis*
- *Iyagoon cadaaliyo maxkamad lagu, caddeyn eedda*
- *Qaar baa canbuulada ku cunay, jeel cadaab badane*

- *Adigoo dhibtaa culus ku yimid, curadyo loo laayey*
- *Inaad calalkan jeexjeexan tahay, laba ciseyneynin*
- *Waa cudur waddinigii caqli leh, cawda jarayaaye*
- *Ciidan waaga aad tahay inaad, ciirsi kala weydey*
- *Iyaba waa cibbaaraha adduun, camaladiisiiye*

- *Intuu qaranka ciirciirayaa, soo rogaal celini*
- *Oo ay cuqaal kale ka iman, ceymin kara beesha*
- *Isku celi ilmada ciil dartii, camanadaa qoysey*

Raad-reeb: Gabayga markaan gocdey waxaa ila joogey Wasiirka Arrimaha Dibedda Dr. Beyle oo ah suugaanyahan allifa maansada. Waxaana rajayn in isaga iyo rag la mid ah ay sii tixraacaan gabayga oo calanka u hiiliyaan.

WDN: Tan iyo burburkii dowladii dhexe ee Soomaaliya, waxa jira in Suugaanta iyo guud ahaan Afka Soomaaligu uu aad u wiiqmay, iyada oo dhalinta hadda ku barbaartay burburkaasi Qurbojoog iyo Dal joog-ba uu Afka Soomaaligu ku liito, maxaad ka odhan laheyd xaaladda guud ee dhinaca Suugaanta iyo Afka Soomaaliga ee jiika hadda soo kacay iyo guud ahaan Soomaalida maanta ?

Xalane: Waa muran ma doonto in Af Soomaaliga oo ah aqoonsiga dhabta ah ee *yaa Soomaali ah* uu qar ka laadlaado. Hadalkaa ahaa *Tix iyo Tiraab*, wuxuu noqdey Tabaqle iyo isku tuurtuur. Hase yeeshee waxaa la qorey buugaag badan oo Suugaanta ah. Waxaa kaloo samaysmay websiteyo qabiilaysan laakiin lagu keydiyo gabayo badan. Marka laga yaabo in Suugaanta siiba gabaygu in muddo ah sii wiswisleeyo, haddana caqligii iyo xigmaddii odayaasha wuu dabargo'ayaa. Taasaa ka dhigeysa websiteyada koboca ah sida Wardheernews inay xoog saaraan ururinta iyo kaydinta murti Soomaaliyeedka: - Maanso iyo Maahmaahba.

WDN: **Waxaya jirta in aad qortay dhowr buuug oo ka hadlaya Suugaanta Soomaalida, gaar ahaan gabayada, bal si kooban noogu guud mar buugaag-taasi nuxurka ay xambaarsan yihiin iyo sababaha aad uga gol laheyd qoristooda?**

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

Xalane: Buugga 1aad: Far-Guri: 2003; Gundhaca gabayga: Guddoonka, Geela, Gulufka, Gabadha

Waxaan ugu talagalay inuu hordhac mug leh u noqodo fahamka hab-dhaqanka Soomaalida anigoo adeegsanaya Gabayga oo aan odhan karo inuu yahay daaqad laga gali karo raadinta taariikhda Soomaalida. Buuggan aad baa loo buunbuuniyey siiba ardayda iyo dadkii akhriyeyba.

Buugga 2aad; Cibaaor 2017*:*

Buuggan oo horraanti Sanadkan la daabacay waxaa ku jira Gabyo badan oo dhan walba taabanaya oo aan tiriyey inta u dhaxeysey 1979 iyo 2017, iyo gabayadii la tiriyey.

Buugga 3aad: Godob La'aan:

Buuggan oon ku ururiyey Maanso nabadeed iyo murtiyo kale oo muujinaya caqliga nabadda u adeegaya ee Soomaalida, walise lama daabicin. Waxaa eegaya *Rift Valey Institute* oo ka fikriaya in la turjumo.

WDN: **Soomaaliya kama jiro mac'hadyo baaxad leh sidii Akedeemiyadii Fanka iyo Suugaanta oo iska xil saara ururinta iyo baadhitaanka Suugaanta, iyada oo ay jirto in dadkii hayay taariikhahaasi ay hadda yar yihiin iyada oo ay u raacdo da'i, ama aysan xusuusan karin taaiikhakhaasi ay horey u hayeen, haddaba intiii aad waday baadhitaanka buugaag-taada, maxaad nooga sheegi kartaa dhibta ka jirta in la helo dad si wacan wax uga sheegi kara taariikhaha Suugaanta Soomaaliyeed?**

Xalane: Inaan loo tooghayn raad-goobkii loo baahnaa in laga ururiyo oo loo sameeyo xarumo inta ay wali wax ka nool yihiin odayaashi iyo suugaan-yahannadi Soomaalida, waxay ka mid tahay ayaandarrada Soomaalida haysata.

Waxaan leenahay Suugaan iyo murti ay yar tahay cid kaloo leh oo muujinaysa qabka iyo isku kalsoonida ay lahaayeen dadkaan ka soo jeedno. Suugaantaas ama ha ahaadeen maanso, ama maahmaahyo ama kuwo kalaba e, waa wax lagu faani karo haddii Ilaahay garansiiyo Soomaalidan qayr-ka-hadhka ah ee hadda nool..

Inta badan dhacdooyinka taariikhiga ah ee soo maray Soomaalida waxaa lagu xusey Gabayo wax ka ifinaya sida wax u dhaceen. Gabayada maanta la hayo waxay jiraan hal qarni, marka laga reebo kuwo aan badnayn oo xusuus dheeri ah reebay sida Raage Ugaas. Kuwan laftoodu waxa laga hayo way yar yihiin. Marka sida muuqata Taariikh-Afeedku (Oral History) waxay jiri kartaa hal qarni iyo wax ku dhaw.

Mararka qaar beelaha iska soo horjeeda waxay u wariyaan dhacdooyinka siyaabo kala duduwan laakiin marka aad loo baadho runta waa la gaadhi karaa, waa haddii inta ay nool yihiin baadhitaano lagu sameeyo.

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

Mararka qaar dad aan xog-ogaal ahayn baa Gabayada waxay siiyaan dad aan lahayn, siiba Gabayaa ay jecel yihiin.

Soomaalidii hore waxay dad qab weyn oo ninna Gabay uusan lahayn ma sheegan jirin, laakiin hadda Gabay boolyadku wuu soo badanayaa. Isku soo xoodhiyoo daba-qabataynta suugaanta Soomalidu waxay u baahan tahay gurmad aan loo kala hadhin.

WDN: Mahadsanid Md. Xalane.

Xalane: Aad iyo aad ayaad ugu mahadsan tihiin fursadda qaaliga ah iyo howsha mugga leh ee aad u haysaan guud ahaan ummadda Soomaaliyeed.

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved